



KEMENTERIAN KESIHATAN MALAYSIA

FOOMKA OGOLAANSHAH TALLAALKA COVID-19

Tallaalka COVID-19 waxaa loo bixiyaa si loo xakameeyo faafitaanka COVID-19 ee dalka. Marka ay sii koradho tirada dadka la tallaalay, sidoo kale waxaa kordhaya tirada dadka uu sare u kacayo unugyada difaac jirku, taas oo yareyn doonta suurtagalnimada cudur aad u daran oo ka yimaada COVID-19. Si dadban, waxaan u ilaalin karnaa kuwa halista ugu jira ee aanay suurtagal aheyn in la siiyo irbadaha tallaalka.

Shirka Guddiga Gaarka ah ee Golaha Qaranka Muzakarah ee Arimaha Diinta Islaamka ee Malaysia oo la qabtay 3 Diseembar 2020 ayaa go'aamiyay in tallaallada COVID-19 ay yihiin kuwo banana ama la oggol yahay oo khasab ku ah kuwa ay go'aamiso Dowladda.

Irbadda tallaalka ee COVID-19 waxaa lagu bixin doonaa hal (1) ama labo (2) qaadasho iyadoo loo eegayo nooca tallaalka. Guud ahaan irbadda tallaalka waxaa lagu duraa muruqa garabka marka laga reebo xaaladaha qaarkood. Nooca tallaalka la bixinayo ayaa ku xiran hadba tallaalka la hayo ama yaala.

Qaadashada tallaalka COVID-19 waxay keeni kartaa waxyeelo fudud iyo waxyeelooyin kale oo laga yaabo in la soo sheegi karo waqti-ka-waqti.

SOOYAALKA CAAFIMAAD

Miyaad/Ma:

- a. la kulantay waxyeelo daran (sida suuxdin, dhicid iyo isbitaal dhigid) kadib markii aad qaadatay wax talaal ah oo hore? HAA MAYA
- b. weligaa ma la hayd taariikh xasaasiyad daran? HAA MAYA
- c. uur baad leedahay mise waad qorsheynaysaa inaad uur qaado? (Haweenka) HAA MAYA
- d. hada ma naasnuujisaa? (haweenka) HAA MAYA

Waan akhriyay/Waa la ii akhriyay macluumaadka ku saabsan tallaalka COVID-19, ujeedadiisa iyo habka loo maamulo tallaalka sida lagu sheegay Xaashida Macluumaadka ee COVID-19 ee loogu talagalay Dadka Qadanaya Tallaalka.

Waxaan halkan ka fahmay:

1. in qaadashada tallaalka COVID-19 ay sababi karto fal-celin iyo waxyeellooyin sida lagu sheegay macluumaadka tallaalka;
2. Aniga ayaa mas'uul ka ah wixii khatar ah ee ka dhalan kara go'aankeyga/ficilkeyga aan ku qaadanayo tallaalka maadaama faa'iidooyinka tallaalku ay ka badan tahay dhibaatooyinka ay leedahay;
3. tallaalku si buuxda uma damaanad qaadayo inaanu igu dhici doonin COVID-19 mustaqbalka;
4. Saxiixida ogolaanshahan si aan u helo tallaalka COVID-19, waxaan si iskaa ah u oggolaaday in aan dhammaystiro tirada irbadaha tallaalka sidii loo qorsheeyay.

Fadlan buuxi ogolaanshaha hooste (hadba kan ku habboon):

- Aniga,.....Lambarka aqoonsiga/Booliska/Milatariga.....***OGOL AAN OGOLEYN** si aan u qaato tallaalka COVID-19.....ee loogu talagalay ***nafta ahaantayda**.
- Aniga,.....Lambarka aqoonsiga/Booliska/Milatariga.....***OGOL/AAN OGOLEYN** si aan u qaato tallaalka COVID-19ee loogu talagalay ***waalidiintay / *dadka igu tiirsan oo la yiraahdo**..... Lambarka.I.C./Booliska/Milatariga

Saxeexa qaataha/Xigtada

Magaca :
Lambarka :
Aqoonsiga :
Taariikhda :

Saxeexa markhaatiga

Magaca :
Lambarka :
Aqoonsiga :
Taariikhda :

** Dul mar nuxurka aan khuseynin*

Ogeysiis muhiim ah: Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan tallaalka COVID-19, fadlan tixraac Xaashida Macluumaadka COVID-19 ee loogu talagalay Qaatayaasha Tallaalka.

Waad ku mahadsantahay wada shaqeyntaada wanaagsan. Fadlan ku soo celi foomkan rugta caafimaadka.